# Faa'iidooyinka 2025 oo kooban AbilityCare (HMO D-SNP):

Xubnooyinka ku nool gobolada kala ah: Brown, Dodge, Goodhue, Sibley, Steele, Wabasha iyo Waseca.

H5703_6986_M

Laga bilaawo janaayo 1, 2025 –Desembar 31, 2025

**1-866-567-7242, TTY 1-800-627-3529 or 711**

Attention. If you need free help interpreting this document, call the above number.

ያስተውሉ፡ ካለምንም ክፍያ ይህንን ዶኩመንት የሚተረጉምሎ አስተርጓሚ ከፈለጉ ከላይ ወደተጻፈው የስልክ ቁጥር ይደውሉ።

ملاحظة: إذا أردت مساعدة مجانية لترجمة هذه الوثيقة، اتصل على الرقم أعلاه.

သတိ။ ဤစာရွက်စာတမ်းအားအခမဲ့ဘာသာပြန်ပေးခြင်း အကူအညီလိုအပ်ပါက၊ အထက်ပါဖုန်းနံပါတ်ကိုခေါ်ဆိုပါ။

កំណត់សំគាល់ ។ បើអ្នកត្រូវការជំនួយក្នុងការបកប្រែឯកសារនេះដោយឥតគិតថ្លៃ សូមហៅទូរស័ព្ទតាមលេខខាងលើ ។

請注意，如果您需要免費協助傳譯這份文件，請撥打上面的電話號碼。

Attention. Si vous avez besoin d'une aide gratuite pour interpréter le présent document, veuillez appeler au numéro ci-dessus.

Thov ua twb zoo nyeem. Yog hais tias koj xav tau kev pab txhais lus rau tsab ntaub ntawv no pub dawb, ces hu rau tus najnpawb xov tooj saum toj no.

ပာ်သူၣ်ပာ်သးဘၣ်တက့ၢ်. ဖဲနမ့ၢ်လိၣ်ဘၣ်တၢ်မၤစၢၤကလီလၢတၢ်ကကျိးထံဝဲဒၣ်လံာ် တီလံာ်မီတခါအံၤန့ၣ်,ကိးဘၣ် လီတဲစိနီၢ်ဂံၢ်လၢထးအံၤန့ၣ်တက့ၢ်.

알려드립니다. 이 문서에 대한 이해를 돕기 위해 무료로 제공되는 도움을 받으시려면 위의 전화번호로 연락하십시오.

ໂປຣດຊາບ. ຖ້າຫາກ ທ່ານຕ້ອງການການຊ່ວຍເຫຼືອໃນການແປເອກະສານນີ້ຟຣີ, ຈົ່ງ ໂທຣໄປທີ່ໝາຍເລກຂ້າງເທິງນີ້.

Hubachiisa. Dokumentiin kun tola akka siif hiikamu gargaarsa hoo feete, lakkoobsa gubbatti kenname bilbili.

Внимание: если вам нужна бесплатная помощь в устном переводе данного документа, позвоните по указанному выше телефону.

Digniin. Haddii aad u baahantahay caawimaad lacag-la'aan ah ee tarjumaadda (afcelinta) qoraalkan, lambarka kore wac.

Atención. Si desea recibir asistencia gratuita para interpretar este documento, llame al número indicado arriba.

Chú ý. Nếu quý vị cần được giúp đỡ dịch tài liệu này miễn phí, xin gọi số bên trên.

Form Approved
OMB# 0938-1421

# Multi-Language Insert

## Multi-language Interpreter Services

**English:** We have free interpreter services to answer any questions you may have about our health or drug plan. To get an interpreter, just call us at 1-866-567-7242. Someone who speaks English/Language can help you. This is a free service.

**Spanish:** Tenemos servicios de intérprete sin costo alguno para responder cualquier pregunta que pueda tener sobre nuestro plan de salud o medicamentos. Para hablar con un intérprete, por favor llame al 1-866-567-7242. Alguien que hable español le podrá ayudar. Este es un servicio gratuito.

**Chinese Mandarin:** 我们提供免费的翻译服务，帮助您解答关于健康或药物保险的任何疑 问。如果您需要此翻译服务，请致电 1-866-567-7242。我们的中文工作人员很乐意帮助您。 这是一项免费服务。

**Chinese Cantonese:** 您對我們的健康或藥物保險可能存有疑問，為此我們提供免費的翻譯 服務。如需翻譯服務，請致電 1-866-567-7242。我們講中文的人員將樂意為您提供幫助。這 是一項免費服務。

**Tagalog:** Mayroon kaming libreng serbisyo sa pagsasaling-wika upang masagot ang anumang mga katanungan ninyo hinggil sa aming planong pangkalusugan o panggamot. Upang makakuha ng tagasaling-wika, tawagan lamang kami sa 1-866-567-7242. Maaari kayong tulungan ng isang nakakapagsalita ng Tagalog. Ito ay libreng serbisyo.

**French:** Nous proposons des services gratuits d'interprétation pour répondre à toutes vos questions relatives à notre régime de santé ou d'assurance-médicaments. Pour accéder au service d'interprétation, il vous suffit de nous appeler au 1-866-567-7242. Un interlocuteur parlant Français pourra vous aider. Ce service est gratuit.

**Vietnamese:** Chúng tôi có dịch vụ thông dịch miễn phí để trả lời các câu hỏi về chương sức khỏe và chương trình thuốc men. Nếu quí vị cần thông dịch viên xin gọi 1-866-567-7242 sẽ có nhân viên nói tiếng Việt giúp đỡ quí vị. Đây là dịch vụ miễn phí .

**German:** Unser kostenloser Dolmetscherservice beantwortet Ihren Fragen zu unserem Gesundheits- und Arzneimittelplan. Unsere Dolmetscher erreichen Sie unter 1-866-567-7242. Man wird Ihnen dort auf Deutsch weiterhelfen. Dieser Service ist kostenlos.

Form Approved
OMB# 0938-1421

**Korean:** 당사는 의료 보험 또는 약품 보험에 관한 질문에 답해 드리고자 무료 통역 서비스를 제공하고 있습니다. 통역 서비스를 이용하려면 전화 1-866-567-7242 번으로 문의해 주십시오. 한국어를 하는 담당자가 도와 드릴 것입니다. 이 서비스는 무료로 운영됩니다.

**Russian:** Если у вас возникнут вопросы относительно страхового или медикаментного плана, вы можете воспользоваться нашими бесплатными услугами переводчиков. Чтобы воспользоваться услугами переводчика, позвоните нам по телефону 1-866-567-7242. Вам окажет помощь сотрудник, который говорит по-русски. Данная услуга бесплатная.

**Arabic:** إننا نقدم خدمات المترجم الفوري المجانية للإجابة عن أي أسئلة تتعلق بالصحة أو جدول الأدوية لدينا. للحصول على مترجم فوري، ليس عليك سوى الاتصال بنا على 1-866-567-7242 سيقوم شخص ما يتحدث العربية بمساعدتك. هذه خدمة مجانية.

**Hindi:** हमारे स्वास्थ्य या दवा की योजना के बारे में आपके किसी भी पर्श्न के जवाब देने के लिए हमारे पास मुफ्त दुभाषिया सेवाएँ उपलब्ध हैं. एक दुभाषिया पराप्त करने के लिए, बस हमें 1-866-567-7242 पर फोन करें. कोई व्यक्ति जो हिन्दी बोलता है आपकी मदद कर सकता है. यह एक मुफ्त सेवा है.

**Italian:** È disponibile un servizio di interpretariato gratuito per rispondere a eventuali domande sul nostro piano sanitario e farmaceutico. Per un interprete, contattare il numero 1-866-567-7242. Un nostro incaricato che parla Italianovi fornirà l'assistenza necessaria. È un servizio gratuito.

**Portuguese:** Dispomos de serviços de interpretação gratuitos para responder a qualquer questão que tenha acerca do nosso plano de saúde ou de medicação. Para obter um intérprete, contacte-nos através do número 1-866-567-7242. Irá encontrar alguém que fale o idioma Português para o ajudar. Este serviço é gratuito.

**French Creole:** Nou genyen sèvis entèprèt gratis pou reponn tout kesyon ou ta genyen konsènan plan medikal oswa dwòg nou an. Pou jwenn yon entèprèt, jis rele nou nan 1-866-567-7242. Yon moun ki pale Kreyòl kapab ede w. Sa a se yon sèvis ki gratis.

**Polish:** Umożliwiamy bezpłatne skorzystanie z usług tłumacza ustnego, który pomoże w uzyskaniu odpowiedzi na temat planu zdrowotnego lub dawkowania leków. Aby skorzystać z pomocy tłumacza znającego język polski, należy zadzwonić pod numer 1-866-567-7242. Ta usługa jest bezpłatna.

**Japanese:** 当社の健康 健康保険と薬品 処方薬プランに関するご質問にお答えするために、無料の通訳サービスがありますございます。通訳をご用命になるには、1-866-567-7242 にお電話ください。日本語を話す人 者 が支援いたします。これは無料のサー ビスです。

## Ogaysiiska Xuquuqda Madaniga ah

**Takoorku waxa uu ku lid yahay sharciga. South Country Health Alliance (South Country)** wax kuma takoorto qaabka ku salaysan waxyaabaha soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- caqiidada
- diinta
- qaabka galmada
- heerka caawimada dad waynaha
- da'da:
- naafanimada (ay ku jirto liidashada jidhka ama maskaxda)
- Jinsiga (ay ku jirto faalooyinka laga bixiyo jinsiga qofka iyo aqoonsiga sinjiga)
- xaalada guurka
- rumaynta siyaasadeed
- xaalada caafimaadka
- heerka caafimaadka
- helida adeegyada daryeelka caafimaadka
- waayo aragnimada sheegashada
- taariikhda caafimaadka
- macluumaadka hide sidaha

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada takoorka haddii aad rumaysan tahay inay kuula dhaqmay qaab takoor ah South Country. Waxaad soo xarayn kartaa cabasho oo waxaad waydiisan kartaa caawimada soo xaraynta cabashada qof ahaan ama boostada, telefoonka, fagaska, ama iimaylka xaga:

Civil Rights Coordinator
South Country Health Alliance
6380 West Frontage Road, Medford, MN 55049
Wicitaan bilaasha ah 866-567-7242  TTY: 800-627-3529 or 711  Fagas: 507-444-7774
iimaylka: grievances-appeals@mnscha.org

**Kaalmada Caawinta ah iyo Adeegyada: South Country** waxay bixisaa kaalmada caawinta iyo adeegyada, sida turjumaano takahasus leh ama macluumaadka qaabab la heli karo, bilaash ah iyo wakhti habboon si loo xaqiijiyo fursada loo siman yahay si looga qayb galo barnaamijyadayada daryeelka caafimaadka. **La xidhiidh** Xubinta Adeega members@mnscha.org ama soo wac 866-567-7242, TTY 800-627-3529 ama 711.

**Adeegyada Caawimada Luqaddda: South Country** waxay bixisaa dhokumenti turjumaan oo turjumaada luqadda lagu hadlo, oo bilaash ah iyo wakhti ku haboon, marka adeegyada caawimada luqadda ay lama huraan u yihiin si loo xaqiijiyo dadka kuhadlo Ingiriisiga xadidan inay si macno buuxda leh u heli karaan macluumaadkayaga iyo adeegyada. **La xidhiidh** Xubinta Adeega members@mnscha.org ama soo wac 866-567-7242, TTY 800-627-3529 ama 711.

## Cabashooyinka Xuquuqda Madaniga ah

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada takoorka haddii aad rumaysan tahay inay kuula dhaqmay qaab takoor ah South Country. Waxaad la xidhiidhi kartaa sidoo kale mid kasta oo ka mid ah wakaaladaha soo socda si toos ah si aad u soo xarayso cabashada takoorka.

**Waaxda Caafimaadka Iyo Adeegyada Aadamaha Maraykanka ee Xuquuqda Aadamaha (U.S. Department of Health and Human Services Office of Civil Rights) (OCR)**

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada OCR, wakaalada federaalka, haddii aad rumaysan tahay in lagu takooray sababtoo ah wax ka mid ah waxa soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- da'da:
- naafanimadooda
- sinjiga
- diinta (xaaladaha qaarkood)

Ula xidhiidh **OCR**si toos ah si aad u soo xarayso cabasho.:

Office for Civil Rights, U.S. Department of Health and Human Services
Midwest Region
233 N. Michigan Avenue, Suite 240 Chicago, IL 60601
Xarunta Jawaabta Macmiilka 800-368-1019, TTY: 800-537-7697
Iimaylka: ocrmail@hhs.gov

**Waaxda Xuquuqaha Aadamaha ah (Minnesota Department of Human Rights) (MDHR)**

Gudaha Minnesota, waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada MDHR, haddii lagu takooray sababtoo ah wax ka mid ah waxa soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- diinta
- caqiidada
- sinjiga
- qaabka galmada
- xaalada guurka
- heerka caawimada dad waynaha
- naafanimadooda

Ula xidhiidh **MDHR**si toos ah si aad u soo xarayso cabasho.:

Minnesota Department of Human Rights
540 Fairview Avenue North, Suite 201, St. Paul, MN 55104
651-539-1100 (codka), 800-657-3704 (wicitaanak bilaashka ah), 711 ama 800-627-3529 (MN Relay), 651-296-9042 (fagaska), Info.MDHR@state.mn.us (iimaylka)

**Waaxda Minnesota ee Adeegyada Aadamaha Minnesota (DHS)**

Waxaad xaq u leedahay inaad soo xarayso cabashada DHS, haddii aad rumaysan tahay in lagu takooray barnaamijyadayada daryeelka caafimaadka sababtoo ah wax ka mid ah waxa soo socda:

- isirka
- midab
- asalka qaranka
- diinta (xaaladaha qaarkood)
- da'da:
- naafanimada (ay ku jirto liidashada jidhka ama maskaxda)
- Jinsiga (ay ku jirto faalooyinka laga bixiyo jinsiga qofka iyo aqoonsiga sinjiga)

Cabashooyinka waa inay qornaadaan oo lagu soo xareeyo gudaha 180 maalmood laga bilaabo taariikhda aad ogaatay takoorka la tuhunsan yahay. Cabashada waa inay ka koobnaataa magacaaga iyo cinwaanka oo faahfaahi takoorka aad ka cabanayso. Dib ayaanu u eegi doonaa oo waxaanu kugu wargelin doonaa wax ku saabsan haddii aanu oggolaanay inaanu baadho. Haddii aanu oggolaano, waanu baadhi doonaa cabashada.

DHS ayaa qoraal ahaan kugu wargelin doono natiijada baadhitaanka. Waxaad leedahay xaqa aad ku qaadato rafcaanka haddii aad khilaafto go'aanka. Si rafcaan aad u qaadato waa inaad codsi qoran u soo dirtaa inaad hesho dib u eegida DHS natiijada baadhitaanka. Soo koob oo sheeg sababta aad u diiday go'aanka. Ku dar macluumaad dheeraad ah oo aad u malaynayso inay muhiim tahay.

Haddii aad cabasho usoo xarayso qaabkan, dadka u shaqeeya wakaalada ee lagu magacaabay cabashada kaama aar goosan karaan. Tan macnaheedu waxa weeye kuma ciqaabi karaan adiga qaabnaba inaad soo xaraysay cabasho awgeed. Ku soo xaraynta cabashada qaabkan kaama joojiso adiga raadinta tallaabooyinka kale ee sharci ama maamul.

Ula xidhiidh **DHS**si toos ah si aad u soo gudbiso cabashada takroorka:

Civil Rights Coordinator
Minnesota Department of Human Services
Equal Opportunity and Access Division
P.O. Box 64997
St. Paul, MN 55164-0997
651-431-3040(cod) ama isticmaal adeega xidhiidhka dadka maqalka ka naafada ah

Hindida Maraykanka ah waxay sii wadi karaan ama bilaabi karaan isticmaalka adeegyada Qabiilka iyo rugaha Caafimaadka Hindida(IHS). Uma baahnaan doono oggolaanshe hore ama kuma soo rogno shuruudo adiga si aad uga hesho adeegyada rugahan. Dadka waayeelka ah ee 65 sanadood iyo ka wayn kuwan waxaa ku jira adeegyada ka Dhaafida Waayeelka ee lagu helo qabiilka. Haddii dhakhtarka ama adeeg bixiyaha kale ee qabiilka ama rugta IHS uu kuu gudbiyo adeeg bixiye ku jira shabakadaada, kaavama baahnaan doono adiga inaad aragto adeeg bixiya daryeelka koowaad ka hor gudbinta.

## Horudhac

Dukumeentigani waa soo koobida ku saabsan faa'iidooyinka iyo adeegyada lagu bixiyo AbilityCare. Waxaa ka mid ah jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo, macluumaadka xiriirka muhiimka ah, dulmar ku saabsan faa'iidooyinka iyo adeegyada la bixiyo, iyo macluumaadka ku saabsan xuquuqdaada xubinka ee AbilityCare. Erayada muhiimka ah iyo qeexitaankoodu waxay u soo baxayaan siday u kala horreeyeen alifbeetada cutubka u dambeeya ee *Buug-gacmeedka Xubinka*.

## Jadwalka ee Tusmooyinka


A. Afeefasho ....8
B. Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) ....9
C. Liiska adeegyada la daboolo....12
D. Faa'iidooyinka lagu daboolay meel ka baxsan AbilityCare....19
E. Adeegyada AbilityCare, Medicare, iyo Caawinaada Caafimaadka aanay daboolin....20
F. Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga xubin ahaan ee qorshaha....20
G. Sida loo xareeyo cabasho ama rafcaan loogu qaato adeeg la diiday....22
H. Maxaad sameen lahayd haddii aad ka shakiso khiyaano ....22

## A. Afeefasho

Soo koobidan adeegyada caafimaadka ee ay daboolayso AbilityCare 1/1/2025. Tani waa soo koobid kaliya. Fadlan akhri *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u hesho liiska dheefaha oo dhan. Waxaad ka arki kartaa *Buug-gacmeedka Xubinka* boggeena www.mnscha.org. Haddii aad rabto nuqul daabacan, wac Adeegyada Xubinka ee AbilityCare nambarka ku yaal boggan hoose.

- AbilityCare (HMO SNP) waa qorshe caafimaad oo qandaraas kula jira barnaamijka Medicare iyo Minnesota Medical Assistance (Medicaid) si loo siiyo faa'idooyin labada barnaamij isdiiwaangeliyaasha. Diiwaangelinta AbilityCare waxay ku xirantahay cusbooneysiinta qandaraaska.

- AbilityCare (HMO D-SNP) waxaa loogu talagalay dadka da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 64 ee ku nool aagga adeega, haysta labada Medicare ee Qaybta A iyo Qaybta B iyo Caawinta Caafimaadka iyo kuwa lagu shahaado naafonimada Maamulka Nambarka Bulshada ama Kooxda Dib u Eegista Caafimaadka Gobolka.

- Hoosta AbilityCare waxaad ka heli kartaa Medicare iyo Adeegyada Caawinta Caafimaadka hal qorsho caafimaad. Iskuduwaha daryeelka AbilityCare ayaa kaa caawin doona maaraynta baahiyahaaga daryeelka caafimaadka.

- Macluumaadka ku saabsan adeegyada la-talinta doorashada, wac Waaxda Adeegga Aadanaha ee Minnesota ee Taageerada Macmiilka Daryeelka Caafimaadka (HCCS) khadka 1-651-297-3862 ama 1-800-657-3672.

- Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Medicare, waxaad ka akhrin kartaa *Medicare & Adiga* buug-gacameedka. Waxay leedahay soo koobida faa'iidooyinka Medicare, xuquuqaha, iyo ilaalinta iyo jawaabaha su'aalaha inta badan la is weydiiyo ee ku saabsan Medicare. Waxaad ka heli kartaa website-ka Medicare (www.medicare.gov) ama adigoo wacaya 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227), 24 saac maalintii, 7 maalmood todobaadkii. Isticmaalayaasha TTY waa inay soo wacaan 1-877-486-2048.

- Dukumeentigan waxaad ku heli kartaa bilaash oo qaabab kale ah, sida farta waaweyn, farta indhoolaha, ama maqalka. Wac 1-866-567-7242, TTY 1-800-627-3529 ama 711, 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo, 7 maalmood usbuucii laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarso, iyo Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo Abriil ilaa Sebtembar. Wicitaankan waa lacag la'aan.

- Si aad u samayso ama aad u bedesho codsiga joogtada ah si aad u hesho dukumeentigan, hadda iyo mustaqbalka, luqad aan Ingiriisi ahayn ama qaab kale, wac Adeegyada Xubinka nambarka hoose ee boggan.

## B. Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ)

Jadwalka soo socda ayaa taxaya su'aalaha inta badan la is weydiiyo.

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Waa maxay qorshaha daryeelka aasaasiga ah ee baahiyaha gaarka ah (SNBC)?** | Qorshaheena waa qayb ka mid ah daryeelka aasaasiga ah ee baahiyaha gaarka ah (SNBC) ee barnaamijka. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota waxay u qaabaysay barnaamijkaan iskaa wax u qabso ah si uu u siiyo daryeelka caafimaadka dadka naafada ah da'da 18 ilaa 64. Qorshaheena waxa uu isku daray Medicare iyo Adeegyada Caawinta Caafimaadka. Waxay isku daraysaa takhaatiirtaada, isbitaalka, farmashiyeyaasha, daryeelka caafimaadka guriga, daryeelka guriga kalkaalinta, iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka hal nidaam daryeel oo isku xiran. Waxa kale oo ay leedahay isku-duwayaasha daryeelka si ay kaaga caawiyaan inaad maamusho dhammaan adeeg bixiyaashaada iyo adeegyadaada. Dhammaantood way wada shaqeeyaan si ay u bixiyaan daryeelka aad u baahan tahay.<br><br>Barnaamijkeena SNBC waxa loo yaqaan AbilityCare. |
| **Miyaan heli doonaa isla faa'iidooyinka Medicare iyo Kaalmada Caafimaadka ee AbilityCare ee aan hadda helo?** | Waxaad si toos ah uga heli doontaa inta badan faa'iidooyinka Medicare iyo Gargaarka Caafimaadka ee AbilityCare. Waxaad la shaqayn doontaa koox bixiyeyaal ah kuwaas oo kaa caawin doona go'aaminta adeegyada sida ugu wanaagsan u dabooli doono baahiyahaaga. Tani waxay ka dhigan tahay in qaar ka mid ah adeegyada aad hadda hesho ay isbeddeli karaan iyadoo lagu salaynayo baahiyahaaga, iyo qiimaynta dhakhtarkaaga iyo kooxda daryeelkaaga. Waxa kale oo aad ku heli kartaa faa'iidooyin kale oo ka baxsan qorshahaaga caafimaadka si la mid ah sida aad hadda u hesho, si toos ah meel kale, sida Gobolka, degmada, dawladda dhexe, ama qaranka Qabiilka.<br><br>Markaad iskadiiwaangeliso AbilityCare, adiga iyo kooxdaada daryeelkaaga waxaad ka wada shaqayn doontaan sidii aad u samayn lahaydeen Qorshe Daryeel ee Shakhsiyeed si wax looga qabto baahiyahaaga caafimaadka iyo taageerada, taasoo ka tarjumaysa dookhyadaada shakhsi ahaaneed.<br><br>Haddii aad qaadato dawooyinka Medicare Qaybta D ee aanay AbilityCare caadi ahaan daboolin, waxaad heli kartaa sahay ku meel gaar ah waxaanan kaa caawin doonaa inaad u gudubto daawo kale ama aad hesho ka reeban AbilityCare si ay u daboosho daawadaada haddii caafimaad ahaan loo baahdo. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Adeegyada Xubinka nambarada ku qoran boggan hoose. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Ma isticmaali karaa bixiyaasha daryeelka caafimaadka isku midka ah ee aan hadda isticmaalo?** | Tani inta badan waa kiis. Haddii bixiyayaashaada (ay ku jiraan dhakhaatiirta, isbitaallada, daaweeyaasha, farmashiyaasha, iyo bixiyaasha kale ee daryeelka caafimaadka) ay la shaqeeyaan AbilityCare oo ay nala yeeshaan qandaraas, waad sii wadan kartaa inaad u tagto.<br><br>• Bixiyaasha heshiiska nala gala waa "waa shabakada dhaxdeeda." Bixiyaasha shabakadu waxay ka qayb qaataan qorshaheena. Taas macnaheedu waa inay aqbaleen xubnaha qorshaheena oo ay bixiyaan adeegyo uu daboolo qorshaheena. **Waa inaad isticmaashaa bixiyaasha shabakadda AbilityCare**. Haddii aad isticmaasho bixiyaasha ama farmashiyaasha aan ku jirin shabakadeena, shabakada ma bixinayso adeegyadan ama daawooyinka.<br><br>• Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah ama xaaladaha daryeelaka degdega ah ama adeegyada sifaynta ka baxsan aagga, waxaad isticmaali kartaa bixiyaasha ka baxsan qorshaha AbilityCare. Waxa kale oo aad u isticmaali kartaa bixiyaasha shabakada ka baxsan adeegyada **gelitaanka fura** iyo xaaladaha marka AbilityCare ay ogolaato isticmaalka bixiyaasha shabakadaha ka baxsan.<br><br>• Haddii aad hadda lagaa daweynayo bixiye ka baxsan shabakadda AbilityCare, ama aad xiriir la leedahay bixiye ka baxsan shabakadda AbilityCare, wac Adeegyada Xubinka si aad u hubiso inaad ku xiran tahay.<br><br>Si aad u ogaato in bixiyaashaada ay ku jiraan qorshaha shabakada, wac Adeegyada Xubinka nambarada ku taxan boggan hoose ama ka akhri Bixiyaha AbilityCare *iyo qaamuuska* Farmashiyaha website-keena [www.mnscha.org](www.mnscha.org).<br><br>Haddii AbilityCare ay kugu cusub tahay, waxaanu kula shaqayn doonaa sidii aad u samayn lahayd qorshe daryeel si wax looga qabto baahiyahaaga. |
| **Waa maxay isku-duwaha daryeelka AbilityCare?** | Iskuduwaha daryeelka AbilityCare waa hal qof oo muhiim ah oo aad la xiriirto. Qofkani wuxuu kaa caawinayaa inuu maareeyo dhammaan adeeg bixiyaashaada iyo adeegyada wuxuuna hubinayaa inaad hesho waxaad u baahan tahay. |
| **Maxaa dhacaya haddii aan u baahdo adeeg laakiin qof ka tirsan shabakadda AbilityCare aan bixin karin?** | Inta badan adeegyada waxaa bixin doona bixiyaasha shabakadeena. Haddii aad u baahan tahay adeeg caymis ah oo aan lagu bixin karin shabakadeena, AbilityCare ayaa bixin doonta kharashka bixiyaha shabakada ka baxsan. Ogolaansho hore ayaa loo baahan karaa ka hor inta aan adeegyada laga helin bixiyaasha shabakadaha aan ku jirin. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Su'aalaha inta badan la is weydiiyo (FAQ) | Jawaabaha |
|---|---|
| **Halkee laga heli karaa AbilityCare?** | Aagga adeegga ee qorshahan waxaa ka mid ah degmooyinkan ee Minnesota: Brown, Dodge, Goodhue, Sibley, Steele, Wabasha, iyo Waseca. Waa inaad ku nooshahay mid ka mid ah degmooyinkan si aad ugu biirto qorshaha. Ka wac Adeegyada Xubinka nambarada ku taxan xagga hoose ee bogga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan haddii qorshaha laga heli karo meesha aad ku nooshahay. |
| **Waa maxay Oggolaanshaha Hore?** | Oggolaanshaha hore macnaheedu waa ogolaanshaha AbilityCare si aad u hesho adeegyo ka baxsan shabakadeena ama si aad u hesho adeegyo aanay si joogto ah u daboolin shabakadeena **ka hor** intaadan helin adeegyada. AbilityCare ma daboosho adeega, nidaamka, shayga ama dawada haddii aadan helin ogolaansho hore.<br><br>**Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah ama xaalad daryeel oo degdeg ah ama adeegyada sifaynta meel ka baxsan, uma baahnid inaad oggolaansho hore hesho.** AbilityCare waxay ku siin kartaa adiga ama bixiyahaaga liiska adeegyada ama nidaamyada lagaa doonaya AbilityCare inaad ka hesho oggolaansho hore ka hor inta aan adeegga la bixin.<br><br>Tixraac **Cutubka 3**, ee *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad wax badan uga ogaato oggolaanshaha hore. Tixraac jaantuska faa'iidooyinka ee **Cutubka 4** ee *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u ogaatid adeegyada u baahan oggolaansho hore.<br><br>Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan in oggolaansho hore looga baahan yahay adeegyo gaar ah, habraacyo, shay, ama daawo, wac Adeegyada Xubinka nambarrada ku qoran xagga hoose ee kan si aad caawimo u hesho. |
| **Miyaan bixiyaa qaddar bishii (sidoo kale loo yaqaan caymiska) xubin ahaan AbilityCare?** | Maya. Sababtoo ah waxaad haysataa Gargaar Caafimaad, ma bixin doontid wax kharash ah bishiiba caymiska caafimaadkaaga. Si kastaba ha ahaatee, waa in aad sii waddaa bixinta lacagta caymiska ee Qaybta B ilaa caymiska Qaybtaada B uu bixiyo Gargaarka Caafimaadka ama qolo kale oo saddexaad. |
| **Miyaan bixiyaa wax laga jari karo xubin ahaan AbilityCare?** | Maya. Ma bixinaysid wax lagaa jarayo ee AbilityCare. |
| **Waa maxay lacagta ugu badan ee jeebka ka baxsan ee aan ku bixin doono adeegyada caafimaadka xubin ahaan AbilityCare?** | Ma jiro wax la wadaago kharashka adeegyada caafimaadka ee AbilityCare, markaa kharashyadaada jeebka ka baxsan ayaa noqon doona $0. |

## C. Liiska adeegyada la daboolo

Shaxda soo socotaa waa dulmar degdeg ah oo ku saabsan adeegyada aad u baahan karto, kharashyadaada, iyo xeerarka ku saabsan faa'iidooyinka.

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay daryeel isbitaal** | Joogitaanka isbitaalka ee bukaan-jiifka | $0 | Marka laga reebo xaalad degdeg ah, bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga waa inuu kuu sheegaa qorshaha gelitaanka isbitaalkaaga. |
| | Adeegyada bukaan-socodka, oo ay ku jiraan indho-indhayn | $0 | |
| | Adeegyada xarunta qalliinka ambalaaska (ASC) | $0 | |
| | Daryeelka dhakhtarka ama dhakhtarka qalliinka | $0 | |
| **Waxaad rabtaa dhakhtar** | Booqashooyinka lagu daweynayo dhaawac ama jirro | $0 | |
| | Daryeelida si aad uga ilaaliso inaad jirrato, sida tallaalada hargabka iyo baarista si loo hubiyo kansarka | $0 | |
| | Booqashooyinka fayoqabka, sida jirka | $0 | |
| | "Ku soo dhawoow Medicare" booqasho ka hortag ah (hal mar kaliya) | | |
| | Daryeelka takhasuska leh | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay daryeel degdeg ah** | Adeegyada qolka degdega ah | $0 | Waxaad isticmaali kartaa qol kasta oo degdeg ah haddii aad si macquul ah u aaminsan tahay inaad u baahan tahay daryeel degdeg ah. Uma baahnid oggolaansho hore mana aha inaad ku jirto shabakad. Adeegyada qolka degdega ah LAGUMA daboolo meel ka baxsan Maraykanka iyo dhulalkiisa. Wixii faahfaahin ah kala xiriir qorshaha. |
| | Daryeelka Degdega ah | $0 | Daryeelka degdega ah ee loo baahan yahay maaha daryeel degdeg ah. Uma baahnid oggolaansho hore mana aha inaad ku jirto shabakad. Adeegyada qolka degdega ah LAGUMA daboolo meel ka baxsan Maraykanka iyo dhulalkiisa. Wixii faahfaahin ah kala xiriir qorshaha. |
| **Waxaad u baahan tahay baaritaanno caafimaad** | Adeegyada raajada ogaanshaha (tusaale, raajada ama adeegyada sawir-qaadista, sida iskaanka CAT ama MRIs) | $0 | |
| | Baaritaannada shaybaarka iyo hababka daaweynta, sida shaqada dhiigga | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay adeegyada maqalka/ maqalka** | Baaritaanka maqalka | $0 | |
| | Qalabka gargaarka maqalka | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay daryeelka ilkaha** | Baaritaanka ilkaha iyo daryeelka ka hortagga | $0 | |
| | Soo celinta iyo daryeelka ilkaha degdega ah | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay daryeelka indhaha** | Baaritaanka indhaha | $0 | |
| | Muraayadaha ama muraayadaha indhaha | $0 | Xulashada waxaa laga yaabaa inay xaddidan tahay. Mid ka mid ah muraayadaha ama muraayadaha indhaha ka dib qalliin kasta oo indhaha ah, ama muraayadaha indhaha ee xaaladaha qaarkood marka muraayadaha indhaha aysan shaqayn doonin. |
| | Daryeelka aragga kale | $0 | |
| **waxaad u baahan tahay Adeegyada Caafimaadka Dhimirka** | Adeegyada caafimaadka dhimirka | $0 | |
| | Daryeelka bukaan-jiifka iyo bukaan-socodka iyo adeegyada bulshada ku salaysan ee dadka u baahan adeegyada caafimaadka dhimirka | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay Adeegyada Xanuunada Isticmaalka Maandooriyaha** | Adeegyada Xanuunada Isticmaalka Maandooriyaha | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay meel aad kula noolaato dad diyaar u ah inay ku caawiyaan** | Daryeel kalkaaliye oo xirfad leh | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. Daryeelka kalkaalinta xirfadlaha caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah waa la daboolay. |
| | Daryeelka guriga | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay daawayn ka dib istaroog ama shil** | Daaweynta hadalka iyo, shaqada, jirka | $0 | Waxaa laga yaabaa inay xaddidan tahay daaweynta jireed, daaweynta shaqada, iyo adeegyada daaweynta hadalka. Hadday sidaas tahay, waxaa laga yaabaa inay jiraan waxyaabo ka reeban xuduudahan. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay in lagaa caawiyo helitaanka adeegyada caafimaadka** | Adeegyada Ambalaaska | $0 | Adeegyada ambalaasku waa inay caafimaad ahaan daruuri u noqdo. Uma baahnid oggolaansho hore oo loogu talagalay adeegyada ambalaaska mana aha inaad ku jirto shabakad. |
| | Gaadiidka degdega ah | $0 | |
| | Gaadiidka U socda oo Ka socda Adeegyada Caafimaadka | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa.<br><br>AbilityCare loogama baahno inay ku siiso gaadiidka rugtaada daryeelka koowaad (PCC) haddii uu gurigaaga ay u jirto 30 mayl.<br><br>AbilityCare loogama baahno inay ku siiso gaadiidka rugtaada daryeelka gaarka ah haddii uu gurigaaga ay u jirto 60 mayl. |
| | Gaadiidka adeegyada kale ee caafimaadka | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| **Waxaad u baahan tahay daawooyin lagu daweeyo xanuunkaaga ama xaaladaada (ku socotaa bogga xiga)** | Daawooyinka loo qoro Medicare Qaybta B | $0 | Dawooyinka Qaybta B waxaa ka mid ah dawooyinka uu takhtarkaagu kugu siiyo xafiiskooda, qaar ka mid ah daawooyinka kansarka afka, iyo daawooyinka qaarkood oo loo isticmaalo qalabka caafimaadka qaarkood. Akhri *Buug-gacmeedka Xubinka* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan daawooyinkan.<br><br>Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |

# AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay daawooyin lagu daweeyo xanuunkaaga ama xaaladaada (sii so'odo)** | Daawooyinka heerka 1-aad (magaca sumadeedka malaha)<br><br>Daawooyinka heerka 1-aad | $0 oo ah sahayda 30-ka maalmood ee magaca guud iyo magaca sumaddaba | Waxaa laga yaabaa inay jiraan xaddidaadyo ku saabsan noocyada dawooyinka la daboolay. Fadlan tixraac AbilityCare *Liiska Daawooyinka la Daboolay* (Liiska Dawooyinka) wixii macluumaad dheeraad ah.<br><br>AbilityCare ayaa laga yaabaa inay u baahato inaad marka hore isku daydo hal daawo si aad u daaweyso xaaladaada ka hor inta aysan daboolin daawo kale xaaladaas.<br><br>Daawooyinka qaar waxay leeyihiin tiro xadidan.<br><br>Bixiyahaagu waa inuu ka helaa ogolaansho hore AbilityCare daawooyinka qaarkood.<br><br>Waa inaad u isticmaashaa farmashiyaha qaarkood tiro aad u kooban oo daawooyin ah, iyadoo ay ugu wacan tahay maaraynta gaarka ah, iskudubarid bixiyaasha, ama shuruudaha waxbarashada bukaanka oo aanay buuxin karin farmasiyada shabakadaada. Daawooyinkaan waxay ku qoran yihiin bogga qorshaha, *Liiska Daawooyinka la Daboolay* (Liiska Dawooyinka), iyo agabka daabacan, iyo sidoo kale Medicare Plan Finder ee www.medicare.gov.<br><br>Waxaa laga yaabaa inaad ka heli karto dawooyinka qaarkood sahayda fidsan ee farmashiyaha. Wadaagista kharashka sahayda la dheereeyey waxay la mid tahay sahayda halka bil ah. |
| | Daawooyinka laga iibsan karo (OTC). | $0 | Waxaa laga yaabaa inay jiraan xaddidaadyo ku saabsan noocyada dawooyinka la daboolay. Fadlan tixraac AbilityCare *Liiska Daawooyinka la Daboolay* (Liiska Dawooyinka) wixii macluumaad dheeraad ah. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Waxaad u baahan tahay in lagaa caawiyo sidii aad u fiicnaan lahayd ama aad leedahay baahiyo caafimaad oo gaar ah** | Adeegyada Baxnaaninta | $0 | Adeegyada baxnaaninta caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waa la daboolay. Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Qalabka caafimaadka ee daryeelka guriga | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Adeegyada Sifeynta | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay daryeelka cagaha** | Adeegyada lugaha | $0 | Booqashooyinka lugaha ayaa loogu talagalay daryeelka cagaha caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. |
| | Adeegyada lafaha | $0 | Adeegyada la daboolay. |
| **Waxaad u baahan tahay qalab caafimaad oo waara (DME) ama sahay**<br><br>**Xusuusin:** Kani maaha liis dhamaystiran oo DME ah oo la daboolay. Si aad u hesho liis dhamaystiran wac Adeegyada Xubinka ama eeg **Cutubka 4** ee *Buug-gacmeedka Xubinta*. | Kursiga curyaanka, ulaha, iyo lugaha | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Nebulizers | $0 | |
| | Qalabka ogsijiinka iyo sahayda | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay caawimo ku noolaanshaha guriga** | Daryeelka Caafimaadka Guriga | $0 | |
| **Waxaad u baahan tahay Adeegyada turjubaanka** | Turjubaanka luuqadda lagu hadlo | $0 | |
| | Turjubaanka luuqadda dhagoolada | $0 | |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Adeegyada dheeraadka ah (ku socotaa bogga xiga)** | Toobinta | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Iskuduwidda Daryeelka | $0 | Waxa laguu qori doonaa iskuduwaha daryeelka<br>si uu kaaga caawiyo isku xidhka bixiyayaasha, helitaanka ilaha bulshada ee jira, oo uu kaaga caawiyo helitaanka adeegyada aad u baahan tahay. |
| | Adeegyada Jir duugista | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Sahayda iyo adeegyada sonkorowga | $0 | Sahayda iyo adeegyada sonkorowga waxay ku xaddidan yihiin soosaarayaal gaar ah, badeecooyin iyo/ama noocyo marka laga helo farmashiyaha. Kala xiriir Adeegyada Xubinka liiska agabka la daboolay ama booqo mareegaheena **www.mnscha.org**. |
| | Qorshaynta Qoyska | $0 | |
| | Adeegyada Xasilinta Guriyeynta | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | Adeegyaha lugaha la sameeyey | $0 | Xeerarka oggolaanshaha ayaa lagu dabaqi karaa. |
| | daaweynta shucaaca | $0 | |
| | Adeegyada kaa caawinaya maaraynta cudurkaaga | $0 | |
| | Cunooyinka guriga lagu bixiyo | $0 | Qaado 2 cunto maalintii ilaa 89 maalmood ka dib joogitaanka cusbitaalka bukaan-jiifka. Cuntada waa in lagu codsadaa 7 maalmood gudahooda ka dib marka la fasaxo.<br>Xubnaha cafiska ah (DSD ama EW) waxay xaq u leeyihiin kaliya haddii adeegyadooda dhaafitaanka ay gaareen xadka miisaaniyada. |

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| Baahida ama walaaca caafimaadka | Adeegyada aad u baahan karto | Kharashyadaada ee bixiyaasha shabakadaha | Xaddidaad, ka reebis, & macluumaadka faa'iidada (sharciyada ku saabsan dheefaha) |
|---|---|---|---|
| **Adeegyada dheeraadka ah (sii so'odo)** | Qalabka guriga iyo badbaadada ama wax ka beddelka iyo sahayda kor u qaada caafimaadka ama nolol madaxbannaan oo badbaado leh | $0 | Kaliya alaabta ama adeegyada aan daboolin ka dhaafida, ilaa ugu badnaan $1000 sanadkii. |
| | Nidaamka digniinta caafimaadka ee PERS | $0 | Xubnaha xaqa u leh waxa ka mid ah ka-dhaafitaan la'aan ama kuwa ku jira ka dhaafida oo keliya haddii adeeggooda dhaafitaanka uu gaaray xadka miisaaniyadda. |
| | Kaarka Barnaamijka Kaalmada Cuntada - xubnuhu waxay helayaan $210 saddexdii biloodba mar si ay u iibsadaan cunto caafimaad leh. | $0 | Xubinka waa inay u isticmaashaa tafaariiqlayaasha xaqa u leh iibsashada raashinka. Lacagaha waa in la kharash gareeyaa dhammaadka rubuc kasta oo ha soo rogin. Lacagaha cusboonaysiinta rubuc kasta xubinka wuu u qalantaa. Maalgelintu waxay dhammaanaysaa marka u-qalmitaanka AbilityCare uu dhammaado. |
| **Fayoqabka Waxbarashada** | Caawinta JoojintaTubaakada | $0 | Xubnaha waxay heli karaan caawimaad taleefoon ah iyo mid onleen ah iyo waxbarasho oo lacag la'aan ah. |
| | Naadiga caafimaadka / dhimista jirdhiska | $0 | Hel qiimo dhimis ilaa $40 bishiiba xubinimada caafimaadka ee ka qayb qaadanaya. |
| | Dhimista Waxbarashada Bulshada | $0 | Waxay dabooshaa ilaa $15 ee kharashka inta badan fasalada Waxbarashada Bulshada (ilaa 5 sanad dugsiyeedkii) |

Soo koobida kor ku xusan ee faa'iidooyinka waxa loo bixiyay ujeeddooyin macluumaad oo keliya mana aha liis dhammaystiran oo dheefo ah. Si aad u hesho liis dhamaystiran iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dheefahaaga, waxaad akhrin kartaa *Buug-gacmeedka Xubinta* AbilityCare. Haddii aadan haysan *Buug-gacmeedka Xubinka*, wac Adeegyada Xubnaha AbilityCare 1-866-567-7242 (TTY 1-800-627-3529 ama 711) si aad mid u hesho. Haddii aad qabto su'aalo, waxaad sidoo kale wici kartaa Adeegyada Xubinka ama booqo www.mnscha.org.

## D. Faa'iidooyinka lagu daboolay meel ka baxsan AbilityCare

Waxa jira adeegyo aad heli karto oo aanay daboolin AbilityCare laakiin ay ku jiraan Medicare, Caawimada Caafimaadka, ama Hay'ad Gobol ama degmo. Tani ma aha liis dhammaystiran. Ka wac Adeegyada Xubinka nambarrada ku taxan xagga hoose ee boggan si aad u ogaato adeegyadan.

## AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

| **Adeegyada kale ee ay daboolaan Medicare, Gargaarka Caafimaadka ama Wakaaladda Gobolka** | **Kharashkaaga** |
|---|---|
| Qaar ka mid ah adeegyada daryeelka hospice ee laga bixiyo meel ka baxsan AbilityCare | $0 |
| Caawinta Daryeelka Shakhsiga | $0 |
| Adeegyada Daryeelka Guriga | $0 |
| Adeegyada ka-dhaafitaanka ee lagu bixiyo oo Ku-saleysan Guriga iyo Bulshada ee adeegyada laga dhaafo | $0 |

## E. Adeegyada AbilityCare, Medicare, iyo Caawinaada Caafimaadka aanay daboolin

Tani ma aha liis dhammaystiran. Ka wac Adeegyada Xubinka nambarrada ku taxan xagga hoose ee boggan si aad u ogaato adeegyadan.

**Adeegyada AbilityCare, Medicare, iyo Caawinaada Caafimaadka aanay daboolin**

- Adeegyada looma tixgeliyo “macquul iyo lama huraan” marka loo eego heerarka Medicare iyo Caawinta Caafimaadka
- Tijaabada daaweynta iyo daaweynta qalliinka, shay, ama dawooyin ilaa uu daboolo Medicare ama hoos yimaad daraasad caafimaad oo Medicare ay oggolaatay mooyaane
- Daawaynta qaliinka ee buurnaanta jirrada marka laga reebo marka loo baahdo caafimaad ahaan
- Nidaamyada kobcinta doorashada ama ikhtiyaariga ah
- Qalliinka isqurxinta ama shaqada kale ee qurxinta haddii aan la buuxin shuruudaha
- Qalliinka Lasik

## F. Xuquuqdaada iyo waajibaadkaaga xubin ahaan ee qorshaha

Xubin ka mid ah AbilityCare, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah. Waxaad isticmaali kartaa xuquuqahan adiga oo aan lagu ciqaabin. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa xuquuqahan adoon lumin adeegyadaada daryeelka caafimaadka. Waxaan kuu sheegi doonaa waxa ku saabsan xuquuqdaada ugu yaraan hal mar sannadkii. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, fadlan akhri *Buug-gacmeedka Xubinka*. Xuquuqdaada waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, kuwan soo socda:

- **Waxaad xaq u leedahay heshmad, xaqsoor iyo karaamo.** Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Hel adeegyo caymis welwel la'aan oo ku saabsan xaalad caafimaad, heerka caafimaadka, helitaanka adeegyada caafimaadka, khibrad sheegashada, taariikhda caafimaadka, naafanimada (oo ay ku jiraan itaaldarrada maskaxda), xaaladda guurka, da'da, jinsiga (oo ay ku jiraan fikradaha galmada iyo aqoonsiga jinsiga), jihada galmada, asal qaran, isir, midab, diin, caqiido, ama kaalmada dadweynaha
  - Hel macluumaadka luqado kale iyo qaabab (tusaale, farta waaweyn, farta indhoolaha, ama maqal) bilaash ah
  - Ka xorow nooc kasta oo ka mid ah xakamaynta jirka ama gooni-u-fadhiga
- **Waxaad xaq u leedahay inaad hesho macluumaadka ku saabsan daryeelkaaga caafimaad.** Tan waxa ku jira macluumaadka ku saabsan daawaynta iyo daawayntaada. Macluumaadkani waa inuu ahaadaa luuqad iyo qaab aad fahmi karto. Tani waxaa ka mid ah xaqa aad u leedahay in macluumaad aad ka hasho:
  - Sharaxaada adeegyada aanu daboolno

- Sida adeegyada loo helo
- Immisa adeeg ayaa kugu kici doonta
- Magacyada bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka iyo isku-duwaha daryeelka

- **Waxaad xaq u leedahay inaad go'aan ka gaarto daryeelkaaga, oo ay ku jirto diidmada daaweynta.** Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Dooro bixiyaha daryeelka aasaasiga ah (PCP) oo beddel bixiyaha xanaanada aasaasiga ah wakhti kasta inta lagu jiro sanadka
  - Isticmaal bixiyaha daryeelka caafimaadka haweenka iyada oo aan la soo gudbinin
  - Si degdeg ah u hel adeegyadaada la bixiyo iyo daawooyinka
  - Ogow dhammaan xulashooyinka daawaynta, iyada oo aan loo eegin waxa ay ku kacayaan ama haddii ay caymis yihiin
  - Diid daaweynta, xitaa haddii bixiyaha xanaanada caafimaadkaagu kugula taliyo diidmo
  - Jooji qaadhashada daawada, xitaa haddii bixiyaha xanaanada caafimaadkaagu kugula taliyo diidmo
  - Weydiiso ra'yi labaad. AbilityCare ayaa bixin doonta kharashka booqashada ra'yigaaga labaad
  - Ku sheeg rabitaannadaada daryeelka caafimaadka dardaaranka hore

- **Waxaad xaq u leedahay in wakhti ku haboon aad hesho daryeel aan lahayn wax isgaarsiin ah ama caqabado gelitaanka jirka.** Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Hel daryeel caafimaad oo ku habboon
  - Soo gal oo ka bax xafiiska bixiyaha xanaanada caafimaadka. Tani waxay ka dhigan tahay gelitaanka bilaa caqabada ah ee dadka naafada ah, si waafaqsan Xeerka Naafada Ameerika
  - Hayso turjubaano kaa caawiya xiriirika bixiyayaasha daryeelka caafimaadka iyo qorshahaaga caafimaad

- **Waxaad xaq u leedahay inaad raadsato daryeel degdeg oo degdeg ah markaad u baahan tahay.** Tani waxay ka dhigan tahay inaad xaq u leedahay:
  - Hel adeegyada degdegga ah iyada oo aan oggolaansho hore laga helin xaalad degdeg ah
  - Isticmaal bixiye daryeel degdeg ah oo ka baxsan shabakada, marka loo baahdo

- **Waxaad xaq u leedahay qarsoodi iyo sir.** Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Weydiiso oo hel nuqul ka mid ah diiwaannadaada caafimaadka si aad u fahmi karto oo aad u codsato in diiwaannadaada la beddelo ama la saxo
  - Xogtaada caafimaad ha ahaato mid sir ah
  - Qarso inta lagu jiro daawaynta

- **Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho ka samayso adeegyadaada ama daryeelkaaga la daboolay.** Tan waxaa ka mid ah xuquuqda:
  - Soo gudbi cabasho ama cabasho ka dhan anaga ama bixiyaasheena
  - Weydiiso Racfaan Goboleed (Dhageysiga Cadaalada ee Medicaid ee Gobolka)
  - Hel sabab faahfaahsan sababta adeegyada loo diiday

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada, fadlan akhri *Buug-gacmeedka Xubinka*. Haddii aad qabto su'aalo, waxaad wici kartaa Adeegyada Xubinka ee AbilityCare nambarada ku qoran boggan hoose.

Waxa kale oo aad ka wici kartaa Xafiiska Dhexdhexaadiyaha ee Barnaamijyada Daryeelka Caafimaadka la Maareeyay 1-800-657-3729 (TTY: 711 ama isticmaal adeegyada gudbinta ee aad doorbiday). Wicitaankan waa lacag la'aan.

## G. Sida loo xareeyo cabasho ama rafcaan loogu qaato adeeg la diiday

Haddii aad qabto cabasho ama aad u malaynayso in AbilityCare ay tahay inay daboosho wax aanu diidnay, wac Adeegyada Xubinka nambarada ku qoran boggan hoose. Waxaa laga yaabaa inaad racfaan ka qaadan karto go'aankeena.

Wixii Su'aalo ah oo ku saabsan cabashooyinka iyo rafcaannada, waxaad akhrin kartaa **Cutubka 9** ee *Buug-gacmeedka Xubinka*. Wixii macluumaad dheeraad ah, wac Adeegyada Xubinka nambarada ku qoran boggan hoose.

Waxaad sidoo kale noo soo qori kartaa. Fadlan u soo dir:

AbilityCare
South Country Health Alliance
Attn: Grievance and Appeals Department
6380 West Frontage Road
Medford, MN 55049

## H. Maxaad sameen lahayd haddii aad ka shakiso khiyaano

Inta badan xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo ururada bixiya adeegyada waa daacad. Nasiib darro, waxaa jiri kara qaar aan daacad ahayn.

Haddii aad u malaynayso in dhakhtar, isbitaal, ama farmashiye kale uu sameynayo wax khaldan, fadlan nala soo xiriir.

- Naga soo wac Adeegyada Xubinka AbilityCare ee nambarada ku taxan xagga hoose ee boggan.
- Wac Khadka Tooska ah ee Khiyaanada AbilityCare 1-877-778-5463.
- Ama, wac khadka tooska ah ee khiyaanada Minnesota 1-800-627-9977. Isticmaalayaasha TTY waxay wici karaan 711. Wicitaankan waa lacag la'aan.
- Ama, ka wac Medicare 1-800-MEDICARE (1-800-633-4227). Isticmaalayaasha TTY waxay wici karan 1-877-486-2048. Waxaad wici kartaa nambaradan bilaashka ah, 24 saacadood maalintii, 7 maalmood todobaadkii.

# AbilityCare (HMO D-SNP): Faa'iidooyinka 2025 oo kooban

**Haddii aad qabto su'aalo guud ama su'aalo ku saabsan qorshaheena, adeegyada, goobta adeegga, biilasha, ama Kaararka Aqoonsiga Xubinka, fadlan wac Adeegyada Xubinka AbilityCare:**

## WAC 1-866-567-7242

Wicitaankan waa bilaash. 8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo, 7 maalmood usbuucii laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarso, iyo Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo Abriil ilaa Sebtembar. Adeegyada Xubnuhu waxa kale oo ay leeyihiin adeegyo turjumaan luqadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlin.

## TTY/Adeegga Gudbinta 1-800-627-3529 ama 711

Wicitaanka waa bilaash.8 subaxnimo ilaa 8 galabnimo, 7 maalmood usbuucii laga bilaabo Oktoobar ilaa Maarso, iyo Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo Abriil ilaa Sebtembar. nambarkan waxa uu u baahan yahay qalab telefoon oo gaar ah waxaana loogu talagalay dadka ay ku adag tahay maqalka ama hadalka.

### Haddii aad su'aalo ka qabto caafimaadkaaga:

- Waxaad bedeli kartaa rugtaada daryeelka koowaad (PCC). Raac tilmaamaha PCC-gaaga si aad u hesho daryeelka marka xafiiska la xiro.
- Haddii xafiiska PCC-gaagu xiran yahay, waxaad sidoo kale wici kartaa **Khadka talobixinta kalkaalisada 24-saac**. Kalkaaliso ayaa dhagaysan doonta dhibaatadaada waxayna kuu sheegi doontaa sidaad u heli lahayd daryeel. (Shakhsi-daryeel, daryeel degdeg ah, qolka degdega ah) Wac nambarka ku yaal dhabarka dambe ee kaarka aqoonsiga xubinka. Wicitaanada nambarkan waa bilaash. Adeegyada Xubnuhu waxa kale oo ay leeyihiin adeegyo turjumaan luqadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlin.
- Haddii aad u baahan tahay daryeel degdeg ah, waxaad kala xiriiri kartaa Doctor on Demand™ website-ka doctorondemand.com ama abka mobaylka. Hayso aqoonsiga xubintaada. Waxaad u baahan doontaa inaad sameeysato akoon bilaash ah. Dhakhaatiirta ayaa la heli karaa 24/7/365 in ka yar 5 daqiiqo.

**Haddii aad u baahan tahay daryeel caafimaad degdeg ah ee dhenaca deebacada, fadlan wac Khadka Dhibaatada Caafimaadka Dhimirka ee Minnesota**

Wac nambarka hoose ee degmada aad ku nooshahay. Wicitaanada nambaradaan waa bilaash.

Wicitaannada waxaa laga jawaabaa 24 saac maalintii, 7 maalmood todobaadkii.

Waxa kale oo ay hayaan adeegyo turjumaan luqadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan dadka aan Ingiriisiga ku hadlin.

**Brown** 1-877-399-3040

**Dodge** 1-844-274-7472

**Goodhue** 1-844-274-7472

**Waseca** 1-844-274-7472

**Sibley** 1-877-399-3040

**Steele** 1-844-274-7472

**Wabasha** 1-844-274-7472